



SWSSC NEWSLETTER

JANUARY 2019 EDITION

Informative | Transparent | Factual

INTRODUCTION

SWSSC Newsletter is a monthly compilation of events concerning good governance, human rights, and humanitarian situation in South West Somalia. The articles in the newsletter are written in English, Somali Maay, and Somali Maxa. SWSSC welcomes ideas and opinions on how to best salvage the people of SWS by sending an email to nl@swsomaliasalvation.org. Readers can download this and past newsletters at our website: <http://swsomaliasalvation.org/index.php/newsletter/>

GOOD GOVERNANCE

FREE SHEEKH MUKHTAAR ROOBOW

Golaha Badbaadada Koonfur Galbeed Soomaaliya (GBKGS) waxuu soo dhoweynayaa dadaalada ay wadaan masuuliyiinta ugu horeeyaan Gudoomiyaha Golaha Shacabka Dowlada Federaalka Soomaaliya (DFS) Mudane Maxamed Mursal, iyo Madaxweynaha maamulka KGS Mudane Cabdicaziiz Maxamed Xassan Laftagareen oo ku saabsan sii deynta Sheekh Mukhtar Roobow oo ay hayaan laamaha amniga ee DFS.

GBKGS waxuu mar badan ku celceliyay in si shuruud la'aan ah lagu sii daayo Sheekh Mukhtar Roobow maadaama aan wax danbi ah lagu heynin, maxkamadna la geeynin, xiritaankiisana wado sharci daro ah loo maray. Kadib marka la sii daayo Sheekh Mukhtar, waxaa looga baahan yahay DFS inay saxdo waxii qalad ah ee dhacay oo ay ka mid yihiin:

- In sameeyo baaritaan ku saabsan qabashada iyo xirida Sheekh Mukhtar Roobow
- In magdhow la siiyo ehelada shacabkii lagu laayay Baydhabo, magdhow aay kaga qanci karaan dulmigii lugu sameeyey
- In laga dhaafo faragelinta lagu haayo shacabka KGS inay ka tashadaan aayahooda

In this issue

- INTRODUCTION
- GOOD GOVERNANCE
 - FREE SHEEKH ROOBOW
- HUMAN RIGHTS
 - FARMAAJO'S SILENCE ON BAIDOA MASSACRE
- SECURITY REPORT
- ABOUT SWSSC

Editorial Staff: Aden Moalim

nl@swsomaliasalvation.org

www.swsomaliasalvation.org

Facebook:
[SWSomaliaSalvationCouncil](https://www.facebook.com/SWSomaliaSalvationCouncil)

Twitter: [@swsalvation](https://twitter.com/swsalvation)

Baidoa, Somalia

FREE SHEEKH MUKHTAAR ROOBOW

Golaha Badbaadada Koofur Galbeed Soomaaliya (GBKGS) maaybaa ha dhowaayee dadaalka ii billaaweeng masuuliinta Dowlada Federaalka Soomaaliya (DFS) Mudane Maxamed Mursal, iyo Madaxweynaha maamulka KGS Mudane Cabdicaziiz Maxamed Xassan Laftagareen oo ki saabsing ha dhiyoowka Sheikh Mukhatar Roobow oo ing hiriny laamoo ammaangka DFS. GBKGS maay marar badang ki nanageey ing si shuruud laang lahaki dhiyo Sheekh Mukhtaar Roobow maadaama wal dimbi eh liingki haayne, mahkamina liing saarne, hiroowsheeyna shari darri haayi. Ku reed maddii laha dhiyo Sheek Mukhtaar maaybaa liingku baahinya DFS

- Inii iyee ku shaafiido umuta KG walii gef eh ki dhiyi,
- Inii baarto ha qobodoowka iyo hiroowka Sheekh Mukhtaar Roobow,
- Ing magdhow ki qana'a koraang li siyo dadkii dadshoo liki dhamaayi baydhowu
- Inii ku dhaafto faragilinta ii ki haayto sha'abka Koofur Galbeed inii ku talladaang aayishoo.

FREE SHEEKH MUKHTAAR ROOBOW

South West Somalia Salvation Council (SWSSC) welcomes the initiative of the Speaker of Federal Parliament of Somalia Mohamed Mursal Sheikh Abdurahman and the President of South West Somalia Abdiaziz Hassan Mohamed Laftagareen to release Sheikh Mukhatar Roobow from NISA prison. SWSSC reiterates its appeal to have Sheikh Mukhtaar Roobow released without any condition since his capture and imprisonment were illegal under the constitution of the Federal Government of Somalia (FGS). After the release of Sheikh Mukhtaar Roobow, the FGS must:

- Investigate the capture and imprisonment of Sheikh Mukhtaar Roobow and bring the perpetrators to justice.
- Give convincing compensation to the families of the victims
- Stop interfering on South West Somalia communities to decide on their affairs

HUMAN RIGHTS**XASUUQII BAYDHABO IYO AAMUSNAANTA MADAXWEYNE FARMAAJO**

Xasuuqii Baydhabo ee 13-15 Diseember 2018 waxay noqotay wax ay la yaabaan Soomaalida iyo beesha caalamka. Madaxweynaha Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo marnaba kama hadlin xasuuqa, iskaba daayee inuu ka tacsiiyeeyo asoo fursad u heestay xiligii uu ka qeyb galaayay caleema saarka madaxweyne Abdiasis Hassan Mohamed Laftagareen 16/1/2019.

Waxaa la filaayey inuu si uun wax ooga yiraahdo oo uu dareenkiisa Soomaalinimo iyo Mas'uulnimo ka

muujiyo arrinta foosha xun ee ka dhacdey Baydhaba. Nasiib darose noqon weeydey inuu dareen Soomaalinimo iyo tu Masuulnimo muujiyo bal ka sii darane wuxuu aad iyo aad ugu ammaaney uguna hambalyeey falalkii foosha xumaa aay sameeyeen ciidamada Itoobiyaanka iyo booliska Federaalka laga keeney sideey dadkii u gumaadeen iyo caburin iyo argagax ugu rideen bulshada reer Koonfur Galbeed. Is weydintu waxy tahay Madaxweyne Mohamed Abdullahi Farmaajo ma cadaawad gaar ah oo uu u qabo reer Koonfur Galbeed miyuu sidaasi u sameeyey mise waa dhaqan u gogol xaaraya inuu noqdo kaligii taliye

oo ku doonaya inuu Soomaalida oo dhan sidaas ku xukumo?

GBKGS wuxuu ka codsanayaa Qaramada midoobey iyo ururada xuquuqul insaanka inay isha ku haayaan dhacdooyinka iyo falalka ka baxsan xuquuqul insaanka ee ka dhacaaya wadanka Soomaaliya si loo badbaadiyo shacabka Soomaaliyeed.

HASUUQII BAYDHABO IYO SHIBANAANTA MADAWIINE FARMAAJO

Walaa Baydhowa ku dhiyi 13-15 Desemeber 2018ka Soomaalida iyo bulshida adduungka iyee li yaabeeng. Madawiinaaga umuta Soomaaliyeed maddoona haaba yaraadoo muku hadalne. Ta'asiyi usku dhaafe ku huma walaa Baydhowa ku dhiyi hataa me erene. Maaybaa eed lili yaabeey gaar ahaang Soomaalida eed ili yaabteey ing Mada wiina Mahamad Abdullahi farmajo Baydhwu seedi usugoo ku qiib gali aleema saarka mada wiina Abdiasis Hassan Lafta gareeng 16/12/2018. Maay luku sugaayeeey ama luku filidaayeeey inii usu sidii haatoba wal ungu sheego falka banuuadmi nimada ku basanaayi oo Baydhowa ku dhiyi. Nasiidorry, arrintaas mi dhiine ing usu dareeng Soomaalinimy iyo tu Masuulnimy muujihiyo bal ku sii dorone maaybaa eed iyo eed ingka ammaaney ingkina hambalyeeyey falkii foolla xumaayi yoo suubiyeeng iidimee Itoobiaangka iyo booliska Xamar luku sheeni iyoonyay gumaadkii iyo aburintii iyo argagax ingki rideeng bulshida reer Koofur Galbeed.

Walaa liis warsadaaw may etaa sida Mada wiina Mahamd Abdullahi farmajo kili dhagami reer Koofur Galbeed odowtinimoo gaar eh usu ing qabuwa misii arrinta ing gogol haaridoow keli talisnimuwu? Jawaata may ing muuqitee inii arrinta

ety ing gogol haaridoow keli talisnimo iyo odowtinimo gaar eh usu ing qabo Beella Koofur galbeed. Kelitalisnimida maaybaa addeyng ing ahaa sida usu ili dhagamaaw maamul goboleedyada, odowtinimidina maay addeeng ing ahaa buugii beenta ki buutii usu ki qaadidi shahaadada Mastarka oo usu ki tilmaamiing Dighil Mirifle eyiing 20% umuta Soomaaliyeed (maayba ognaa inii Soomaaliya marna ungu dhiine tiro koob sah eh), iyo aamusooowka usu ku aamusi hasuuqii Baydhowa ku dhiyi. Golaha Badbaadad Koofur galbeed maayba Qaramada midoowi iyo Ururrada in doodaayaang huquul insaangka inii haqiijiyaang in Dowladda Fedralka Soomaliya iyo maamul goboleedyda inii dhooraang shurru'da aalamiga iyo inii baaraang dadkii jeeysidi hasuuqii Baydhowa iyo in shariga li hor sheen

FARMAAJO'S SILENCE ON THE BAIDOA MASSACRE

Is the Attitude of president Mohamed Abdullahi Farmaajo Against South West Somalia (SWS) communities enmity or paving the way for dictatorship? Shameful was the attitude of the Somali president Mohamed Abdullahi Farmaajo who being in Baidoa has completely ignored about the massacre of Baidoa. The president has failed to even say sorry about what happened in Baidoa on 13-15 December 2018 let alone to send condolences. Not only that, but he has thanked Ethiopian soldiers and Somali police force and army for what they have done on innocent civilians. Is the attitude of President Mohamed Abdullahi Farmaajo an enmity against South West Somalia communities or he is paving the way for dictatorship? The answer seems to be both. In one hand the way he deals with the regional member states is a clear indication for dictatorship and his

master thesis in which he depicts Digil Mirifle as only 20% of Somali population (no census ever done), and his keeping silent about the Baidoa massacre is an indication of enmity for South West Somalia community. SWSSC appeals to United

Nations and International Human rights organizations to assure Somali Federal Government and its member states adhere to International human rights laws, investigate the perpetrators of Baidoa massacre.

SECURITY REPORT

Crimes in South West Somalia regions between January 1 - 31, 2019

Lower Shabelle

Name	Crime	Location	Date
Nabadoon (Elder) Hayesi Mursal	Killed	Afgoi	30-Jan-2019

Bay

Bakool

ABOUT SWSSC

South West Somalia Salvation Councils (SWSSC) is an advocacy group for the people of South West Somalia (SWS) in order to safeguard and prosper them. SWSSC focuses Good Governance, respect for Human Rights, and Humanitarian efforts. In Good Governance, SWSSC works to eliminate corruption and mismanagement, but promotes security, justice, political participation and economic development. In Human Rights, the goal of SWSSC is to end all forms of human rights violations. In the Humanitarian efforts; SWSSC would like to see the end of famine, malnutrition, illiteracy, diseases, and poverty.

SWSSC believes without Good Governance, respect for Human Rights, and Humanitarian efforts, terrorism will take root in SWS in addition to mass migrations to the West. Good Governance, respect for Human Rights, and Prosperity is difficult achieving. Thus SWSSC encourages the people of SWS to stand and support these efforts by participating in the political process; humanitarian efforts; and reporting, condemning any type of human rights violations.